

Unofficial translation

Haweenka Soomaaliya: Da' geesiyaal ah

Haweenka soomaaliyeed waxay la kulmaa kala sooc guud and xad-gud baahsan oo ku reeba noloshooda cawaaqib xun. Iyadoo ay jiraan xaalada adag ayey haweenka Soomaaliyeed muujiyeen adkaysi. In ka badan 20 sanoo dagaal iyo rafaad, baahi iyo xad-gudub, faqri iyo cadaadis, haddane mustaqbalka dalka gacmahooda ayuu ku jiraa. Maanta waa maalinta Haweenka Aduunka ku gaar ah, halkan Soomaliya; haweenka waxay ugu dambeystii hiigsanayaan mustaqbalka fiican oo ay xoojinayaa xasilooni weyne ee ka jirta qaybo badan oo dalka ah iyo maamulayaal ku dadaalaya dib u dhiska heshiiska bulsho ee ka dhexeeya dowlad iyo dadkeeda. Laakin ma ahan in aan isku-dhigano guulahaenna, Haweenka waa in ay ka helaan codkood bulshada dhexdeeda.



Xad-gudubka ka dhanka ah haweenka iyo gebdhaha waa mid saameeya bulshooyinkoo dhan. Waa midda ugu baahsanaan badan ee xad-gudubka xuquuqal Insaanka waqtiyadeenaan ee waxyeela sanad kasta malaayiin dhibanayaal ah. Soomaaliya waa xaalad in la fiiriya mudan: Dagaalku wuxuu bedelay kaalimaha jinsiga (raga & haweenka) iyadoo haweenka sida badan kaalin hormuudnimo ka qaataan deberidda noloshu qoysaska sidoo kale ay yihiin kuwa kugu muhimsan wax daryeela xataa haddii raggu xadir yahay. Laakin daqanka assaasiga ah ee la xiririra astaamaha jinsiga wax iska ma bedelin. In kastoo uu jiro koror kaalintooda dhaqaale iyo kaalmada ay siiyaan howlaha qabiilka haddane haweenka soomaaliyeed waxay weli ka takooran yihiin qaab-dhismeedka go'aan gaarista waxayna la kulmaan koror laga naxo ee kufsi iyo xad-gudub galmood wallow uu jiro soo hagaagid xagga nabadgelyad.

Ayadoo aan wada jirno shurakadeena wax fuliya ayaa Midowga Yurub wuxuu si joogta ah u hagaajinaayey galaangaka ay haweenka u leeyihiin helitaanka cadaalad. Tusaale ahaan, Midowga Yurub wuxuu gacan ka geystay abuuritaanka Ururka Qareenadda haweenka taasoo horseeday sanadki hore in la magacaabo haweenidi ugu horeysay ee noqota Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee dalka. Dadaaladaan iyo taagyeradeena ku aadan xaruumada la-talinta sharciyeed, Urarada shariciyaqaanada, daladaha ururada haweenka, ayaa kaalmo loogu fidiyey haween soomaaliyeed oo badan. Intaa waxaa dheer, Midowga yurub oo taakuleeya xaruumaha lagu daaweeyo xad-gudubiyada jinsiga la xiriira ee dalka kuwaasoo ah xaruumo lagu siiyo adeeg daryeel dhibanayaasha kufsiya.

Waqti ayey qaadan doontaa in la hagaajiyo xaalada haweenka iyo gebdhaha Soomaaliyeed. Laakin soomaaliya horey u socotaa. Wada toosna way heysaa. Dowlada federalka soomaaliyeed waxay tusaale ka dhigtay magacaabi Fowsiya Haji Aden in ay noqoto haweenidi ugu horeysay ee noqota Ku-xigeenka Koowaad ee Raisul wasaare iyo wasiir arrimaha dibada iyo sidoo kale Maryam Qasim wasiiradda addega Bulshada. Haweenka qaaya leh ayaa qabanaya kaalimo muhim ah: waa il rajo u leh Soomaali badan in isbedel imaanayo.

Isbedelku waa howl waqti dheer qaadanaysa laakin waxay ka bilaaban karta "heshiiska Cusub" ay Soomaaliya qaybta ka tahay. Tannu ma ahan kaliya qorsho dhalanteed ku dhisan ama tab lagu siinayo tixgelin haweenka. Waxay ku saabsan tahay bedelidda nolosha iyo rajo gelin meel aan waxba jirin. Waxay ku saabsan tahay in la awood siiyo iyo la gaarsiyo haweenka Soomaaliyeed "Heshiiska Cusub". Tani waxay noqon doontaa xudhunta Shirka Brussels ee Soomaaliya ee dhici doona September 2013.

Midowga Yurub wuxuu si la mid diiradda u saarayaa ka qayb galka haweenka dhaqaalaha soomaaliya. "Waxaan ognahay in meel walboo dunida ka mid meeshii ay haweenku ka najaxaan in bulshooyinkane ka najaxaan. Danta cid waliba ayaana ku jirta in haweenku ka mid noqdaan qayb kastoo bulshada ka mid ah" sidaa waxaan dhawaan sheegtay Katharin Ashton, Wakiiladda Sare ee Midowga Yurub ee Siyaasadda Arrimaha Dibada iyo Nabadgelyada. Midowga Yurub wuxuu u tarjumayaa himilooyinkaas wax qabad dhab ah iyadoo lagu taagyeerayo mashaariic xiriir ah ururada bulshada si loo hormariyo sinaanta jinsiga (rag & haweenka), wax baridda haweenka arrimaha xuquuqdooda iyo siyaasada lagu horumarinaayo hal-abuurka maalgashiga haweenka si loogu saamaxo loona awood siiyo horumarinta xirfada iyo dhisidda ururo.

Dabcan, xuquuqda haweenka iyo gebdhaha waxay ka bilaabataa dugsiga. Waxaan rumeysan nahay in haweentii loo diiday in ay heshaa wax barasho hagaagsan waxaa loo diiday sinaanta. Iyadoo uu yahay Midowga Yurub deeq-bixiya ugu weyn qaybta, ayaa gebdhaha in ay galaangal u helaa waxbarashada ayey u tahay muhimadda ugu saraysa. Muuhimaddaan waxaan qaabeeyey dhammaan barnaamijyada waxbarasho ee Midowga Yurub sida talaabooyin dhowr ah oo ay ka mid tahay dhismaha dugsiyo u roon gendhaha, taagyeerida tababarida macallimiin haween ah iyo ka soo qoridda dibada la-taliyayaal xagga jinsiga ah ee ku la-maanan wasaaradaha waxrashada.

Mar haddii Soomaaliya geleyso marxalad cusub, waa in wax laga qabtaa xad-gudubyada mudada dheer soo jiray ee xuquuqda haweenka. Midowga Yurub wuxuu diyaar la yahay in uu sii taagyeero sidi loo gaari lahaa xaalada ay siman yihiin raga iyo haweenka Soomaaliya. Waa in aan ku cad-cad nahay oo aan hubinaa in haweenka la siiyey fursad ay ku dhisi karaan dalkooda, ka mid noqon karaa hanaanka siyaasadeed ayna qayb ka noqon karaan bulsho loo dhan yahay oo cadaalad ah.

Editorial co-signed by:

European Union Envoy to Somalia, Michele Cervone d'Urso

International Labour Organisation Somalia (ILO Somalia)

Vétérinaires sans Frontières Germany (VSF-G)

Minority Rights Group International